



## XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

### WARSAXAAFADDEED 43/2014

#### Ergayga Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo cambaareeyay weerarada argagixiso ee kadhacay Soomaaliya

**Muqdisho, 9 September 2014** – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, (SRSG) Nicholas Kay, ayaa cambaareeyay weerarada argagixiso ee shalay ka dhacay dhowr goobood oo ku yaalla Soomaaliya weeraradaas oo sababay dhimashada iyo dhaawaca dad badan oo rayid ah.

“Waxaan ka naxay dilka loo geeystay dadka rayidka ah ee aan waxba galabsan, dadkaas oo lagu dilay weeraradii argagixiso ee shalay. Hadana kuwa colaadda wado waxay muujinayaan in aanay u haynin dadka Soomaaliyeed wax aan ka ahayn dhibaato joogto ah. Wuxaan ugu baaqayaa dhammaan (dadka) in ay si buuxda ula shaqeeyaan maamulka inta lagu guda jiro baaritaanka dembiyadan foosha xun si loo xaqijiyo in dembiilayaasha la horgeeyo cadaaladda si degdeg ah” ayuu yiri SRSG Kay.

“Waxaan sii xoojineynaa taageridda dadka Soomaaliyeed aan ku taageereeyno sida ay uga shaqeynaayaan xaqijinta rajadooda ku aadan mustaqbal xasilooni iyo nabad ay ku dheehantahay. Waqtigani waa in uu noqdaa waqtii dib-u-heshiisiin (ayada oo laga shaqeynaayo) danaha dhamaan dadka Soomaaliyeed waxaana ku celcelinayaan baaqii Dowladda Federaalka ay u dirtay kuwa diyaarka u ah in ay kasoo laabtaan colaadda oo ay ku biiraan hanaanka siyaasadeed” ayuu raaciay.

SRSG Kay wuxuu tacsi tiiraanyo leh u diraya qoysaska iyo saaxiibada dhamaan dadkii dhibku kasoo gaaray weeraradii argagixiso ee shalay.

Dhamaaad.